BUURDHAAB INTELLECTUAL FORUM

B I F

# BUURDHAAB INTELECTUAL FORUM

**AUGUST 1, 2024**

# XEERKA MADHASHA INDHEER GARADKA BUUR DHAAB

# (BUURDHAAB  INTELLECTUAL FORUM)

**Hordhac**

Madasha **Buurdhaab Intellectual Forum**, waa madal aan dawli ahayn, Siyaasad ku lug lahayn, macaash doon ahayn, kana shaqayn doonta horumarinta deegaannada beelaha Habar Jeclo.

**Qodobka 1: Magaca Madasha**

Magaca madashu waa madasha indheer garadka Buurdhaab ( Buurdhaab Intellectual Forum ) BIF. Waa  madal kulmindoonta aqoonyahanka iyo indheer-garadka Beelaha Habar Jeclo.

**Qodobka 2:**  Madasha xafiiskeeda guud waxa uu noqonayaa magaala Madaxda Gobolka Togdheer ee Burco, waxayna xarumo ku yeelan kartaa dalka gudihiisa(Somaliland) iyo dibadiisa.

**Qodobka  3:**  Astaanta Madashu waa sawirka buurta Buurdhaab



**Qodobka 4:  Yoolka (Vision)**

- Midaynta argtida aqoonyahanka iyo waxgaradka Beelaha Habar Jeclo, si loo abuuro, wax wada qabsiga, difaaca iyo horumarinta deegaanka beelaha Habar Jeclo

**Qodobka 5: himilada (Mission)**

- Adkaynta nabadgalyada amniga iyo difaaca deegaanka beelaha habarjeclo.
- Horumarinta iyo kobcinta arrimaha bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha
- Hirgelinta sanduuq dhaqaale oo ay yeelato (**Buurdhaab Intellectual Forum)**

**Qodobka 6: Ujeedooyinka:-**

Ujeedooyinka Madasha Buurdhaab Intellectual Forum waxaa ka mid ah:

- Midaynta iyo Isku xidhka haldoorka iyo aqoonyahanka beelaha Habar Jeclo
- Adkaynta midnimada iyo wadajirka beelaha Habar jeclo
- Adkaynta iyo ilaalinta difaaca iyo nabadgelyada deegaanada beelaha habarjeclo
- kobcinta nolosha dhaqan dhaqaale ee deegaanada beelaha habarjeclo.
- Horumarinta arrimaha bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha ee deegaanada beelaha habarjeclo.
- Dhiirigelinta, mideeynta iyo jiheeynta ururada horumarinta ee kajira deegaanada beelaha habarjeclo si waxqabadkoodu taabagal u noqdo
- Taageero ama taakulayn kasta oo shuruudi ku xidhnayn madasha buur dhaab way soo dhoweynaysaa

**Qodobka 7: Qaab-Dhismeedka Madasha Buurdhaab**

Qaab Dhismeedka madashu wuxuu ka koobanyahay sidatan:-

1. **Shirwaynaha**
   - ✓ Shirwaynuhu waa haayada ugu saraysa madasha BIF
   - ✓ Shirwaynuhu wuxuu qabsoomayaa sanadkii 2jeer
   - ✓ Shirweynuhu wuxu ansixinayaa Go,aanada golaha dhexe
   - ✓ Shirweynaha waxa laga dhex dooranayaa 50 xubnood oo golaha dhexe ah

2. **Golaha dhexe**
    - ✓ Goloha dhexe wuxuu ka kooban yahay 51 xubnood
    - ✓ Golaha dhexe wuxuu iska dhex dooranayaa 19ka xubnood ee gudida fulinta
    - ✓ Golaha dhexe wuxuu kulmayaa 2dii bilood mar
    - ✓ Goloha dhexe wuxuu ansixinayaa gudida fulinta BIF iyo hawlwadeenada xafiisyada
    - ✓ Golaha dhexe wuxuu hubinayaa xisaab celinta gudida fulinta.
    - ✓ Golaha dhexe wuxuu go'aamadiisa ku ansixinayaa hal dheeri.
    - ✓ Golaha dhexe waxa uu soo jeedin karaa wax ka badalka xeerarka iyo sharciga madasha BIF waxaana la hor dhigayaa shirwaynaha.
    - ✓ Golaha dhexe waxay kulanadooda ku hubinayaan waxqabadka laba biloodlaha iyo qorshaha cusub

**3. Gudida fulinta:**

Gudida fulintu waxay ka kooban tahay 19 xubnood, 9 kamida waxay noqonayaan hawl wadeenada fulinta oo kala ah:

- Gudoomiye
- Gudoomiye Ku xigeen
- Xoghayaha fulinta
- Madaxa dhaqaalaha
- Xidhiidhiyaha dibada
- Madaxa amniga iyo difaaca
- Madaxa horumarinta
- Madaxa H haweenka & dhallinyarada
- Madaxa warbahinta

- ✓ **Masuuliyada gudoomiyaha gudida fulinta:**

- Gudoomiyuhu waa hogaamiyaha gudida fulinta
- Gudoomiyuhu wuxuu hagayaa shirarka gudida fulinta iyo golaha dhexe.
- Gudoomiyuhu wuxu ku matalayaa Gudida fulinta shirarka khuseeya madasha BIF.
- Gudoomiyuhu waa afhayeenka madasha BIF
- Gudoomiyuhu wuxu iclaamin karaa kulan aan caadi ahayn oo golaha dhexe yeeshaan

- ✓ **Masuuliyada gudoomiye ku xigeenka gudida fulinta:**

  - Gudoomiye ku xigeenku wuxuu qabanayaa shaqada gudoomiyuhu u igmado.
  - G/kuxigeenku wuxuu hagayaa shirarka gudida fulinta iyo golaha dhexe marka uu maqan yahay gudoomiyuhu.
  - G/kuxigeenku wuxuu buuxinayaa shaqada gudoomiyaha haddii gudoomiyuhu awoodi kari waayo ama dalka ka baxo

- ✓ **Masuuliyada xoghaya gudida fulinta:**

  - Xoghayaha fulintu waa hormoodka hawlwadeenada gudida fulinta iyo shaqada xafiisyada BIF
  - Xoghayaha fulintu waa masuulka sida joogtada ah ula soconayaa shaqada socota kuna ilaalinayaa madaxyada shaqada.
  - Xoghayaha fulintu waa masuulka sida joogtadaa uga hawl galaya xafiiska guud ee madasha BIF lana soconaaya xafiisyada kale madashu leedahay

  - Xoghayaha fulintu wuxu diyaarinayaa qorshe hawleedka, warbixinta shaqada iyo xisaab xidhka lixbiloodlaha ah
  - Xoghayaha fulinta ayaa hubinaya dhammaan khrashayada madasha BIF
  - Hadii xoghayaha fulintu shaqada awoodi kari waayo ama xanuunsado waxa kusimaha xoghayaha fulinta noqonaya madaxa horumarita

**Masuuliyadda madaxa dhaqaalaha**

- Waxa uu ka mas'uul yahay fulinta dhammaan xisaabaadka madasha BIF
- Wuxuu diyaarinayaa kharashaadka hawlaha madasha BIF
- Waxa uu sugayaa hab- maamulka xisaabta (Accountka ) Madasha BIF
- Wuxu u gudbinayaa xoghayah fulinta xisaab xidhka laba biloodlaha ah

✓ **Masuuliyadda madaxa amniga iyo difaaca:**

- Madaxa arrimaha amniga iyo diffacu waa in uu ahaadaa qof leh aqoon ciidan, deegaankana si fiican u kala yaqaana.
- Waa inuu la socdaa arrimaha amniga iyo difaaca ee deegaanada beelaha habar jeclo
- Waa inuu ka war hayaa ciidamada ku sugan deegaanada beeshu degto.

✓ **Masuuliyadda madaxa horumarinta**

  - Wuxuu diyaarinayaa baahiyaha arrimaha bulsho iyo kaabaayasha dhaqaale ee deegaanada beesha.
  - Wuxuu qorshaynayaa baahida waxbarasho, caafimaad, beeraha, xannaanada xoolaha, biyaha iyo jidadka.
  - Wuxu diyaarinayaa project proposals lahorgeeyo xukuumada, hayadaha samafalka iyo ganacsatada

- Wuxuu soo xulayaa koox (team) aqoonyahano ah oo kala shaqeeya barnamijyada arrimaha bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, beeraha, xanaanada xoolaha iyo wadooyinka.

**Masuuliyadda madaxa xidhiidhka Dibada**

- Wuxuu isku xidhayaa qurbo joogta beesha iyo xafiiska madasha ee Burco.
- Wuxuu xidhiidh la samaynayaa haayadaha samafalka iyo kooxaha ka

  Shaqeeya taakulaynta bulshada

**Masuuliyadda madaxa arrimaha haweenka iyo dhallinyarada**

- Dhiirigelinta waxbarashada haweenka iyo dhalliyarada
- Wacyigelinta haweenka ee kaqayb qaadashada madasha indheer garadka buurdhaab
- Abaabulka haweenka iyo dhalinyarada ee kaqayb-qaadashada horumarinta deeganada beelaha habarjeclo
- Iskaashiga iyo wadashaqaynta madaxa horumarinta

**Masuuliyadda madaxa warbaahinta iyo keydka xogta**

- Maamulka websiteka iyo bogga madasha BIF
- Ilaalinta iyo daryeelka keydka xogta
- Habmaamulka warbaahinta madasha BIF
- Soo bandhigida waxqabadka madasha indheergaradka buurdhaab iyadoo maqal iyo muuqaal ah.

**Qodobka 8aad xubinimada Madasha BIF**

1. Waa inuu yahay qof deegaanada habarjeclo u dhashay
2. Waa inaanu ahayn xubin shaqo joogta ka haysa ( active member) xisbi ama urur siyaasadeed
3. Waa inaanu da'da ka yarayn 30 jir
4. Waa inuu dhammaystay waxbarashada dugsiga sare
5. Waa inuu oggolyahay inuu si mutdawacnimo ah uga kaqayb-qaato hawlaha madasha BIF
6. Waa inuu yahay qof xogta iyo sirta madasha BIF ilaalinaayo.
7. Waa inuu qaadhaanka madasha BIF si joogta ah uga qayb qaadanaya
8. Xubinta ka hortimaado xeerka madasha BIF waxay waayi doontaa xubinnimadeeda

**Qodobka 9aaad Xisaabta ( accountka ) madasha BIF**

- Awooda saxeexa ee accountka BIF waxa wada leh

  1.Guddoomiyaha

  2.Xoghayaha fulinta

  3.Madaxa xisaabaadka

**Qodobka 10 aad : Qaadhaanka madasha indheergaradka buurdhaab**

- Qurbajooga $ 05 bishii iyo ciddii ka badinaysa
- Dalka $ 05 bishii iyo ciddii ka badinaysa
- Cidii kale ee awooda $ 01- 02 bishii

**Qodobka 11aad: Kala Dirista madasha Buurdhaab:**

- Madasha Buurdhaab waxa qudha ee lagu kala diri kara go'aan shirwayne
- **FG**: xeerkan waxa cod aqlabiyad buuxda ku ansixiyey Golaha dhexe 2.8.2024, islamarkaana wuu dhaqan galay.

# QAAB DHISMEEDKA MADASHA INDHEERGARADK BUURDHAAB

